

Xeerka Wasiirka Arrimaha Gudaha lamba. 239 ee 26 Oktoober 1966

Xeer Nidamiyaha howlaha Guddiga iyo Faracyada Midnimada Qaranka

WASIIRKA

Kadib markii la arkay qodobada 83 (2) iyo 85 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay Dekreetada lamba. 86895 ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda ee ku taariskhsanaa 25 Oktoobar 1966 oo lagu dhisayey Guddiga Midnimada Qaranka iyo faracyada gobolka iyo degmooyinka si loo aruuriyo lacagaha loogu tala galay taakuleynta qaxootiga;

Kadib markii la arkay qodobka 4 ee Dekreetada sare ku xusan oo ku saabsan soo saarida xeerarka xeerinaha howlaha Guddiga iyo faracyada Midnimada Qaranka.

Kadib markii la dhegeystay aragtida Golaha Wasiirada.

WAXAA LA SOO SARAY

Qod. 1

Guddiga Midnimada Qaranka ee saldhigeedu yahay Muqdisho wuxuu gudan doona howlaha loo xilsaaray sii loo taakuleyo howlahahooda iyo kuwa faracyada heer gobol iyo heer degmo.

Qod. 2

Howlaha loogu igmaday Sharcigaan waxaa u tilmaami doono Guddiga, howlaha hayeysiinta lagu hormarinaaya danaha qaxootiga meelaha ay ku nool yihiin si loogaga soo aruuriyo hibeyn lacageed.

Qod. 3

Guddigu wuxuu yeelanaya awooda ilaalinta iyo kormeerka howlaha maaliyada ee faracyada heer gobol iyo degmo ay fulinayaa, kuwaas oo la siin doono amarrola xiriira natiijoyinka la higsan doono sida ku cad qodobka 9.

Qod. 4

Gobol kasta waxaa la dhisi doona iyadoo ku hoos jiraan daryeelka Guddomiyayaasha Gobolada, markii laga reebo Gobolka Banaadir, xisaab bankig ee faraca Bangiga Qaranka Somaliyeed oo ay ku qoran tahay magaca Guddiga Midnimada Qaranka kuwaas oo lagu shubi doono wax allaliyo wixii lacag ee laga soo aruuriyey goobaha oo lagu daryeeli doono qaxootiga.

Qod. 5

Lacag ka qaadashada xisaabaha Bangiga waxaa amri kara Guddomiyaha Guddiga Midnimada kadib markii Wasiirka Arrimaha Gudaha u fassax ka helo.

Qod. 6

Guddomiyeyaash faracyada heer degmo waxay si joogta ah ugu soo shubi doonaan lacagaha loo soo aruuriyey qaxootiga xisaabta bangiga ee Gobolka ay ka tirsan yihiin sida ku cad qod. 4.

Qod. 7

Xisaab celinta hibeynta lacageed waxaa la heli kara oo keliya kadib markii lagu qoro warqadaha lacag helista loogu tala galay oo Guddigu u qeybiyey faracyada.

Qod. 8

Warqadaha xisaab helista waxaa si isku xigxigta loo lambareyn doonaa iyadoo shabbado qaleel ah lagu dhufto tiro 100 boggag ah oo 50 boggag yihiin warqado cad 50 kale ay warqad huruud ah. Warqadaha xisaab helista ee cad waa nuqulka asalka ah waxaana la siin doonaa cidda ku deeqday lacagta waqtiga laga guddomay lacagta, warqadda huruudka ah waxay ku hari doonaan blokadyada.

Qod. 9

Dhammadka bil kasto Guddomiyayaasha faracyada degmoyinka waxay u soo diri doonan Guddomiyaha goolka xisab celin liiska ciddi bixisay lacagta iyo lacagaha lagu shubay oo lagu dheji doono blookyada xisaab celinta.

Qod. 10

Guddomiyaha gobolka wuxuu bil kasta buuxin doona xisab celin guud in laba nuqul ee lacagaha la soo uruuriyey degmaooyinka waxaa loo gudbin doona nuqul Guddiga Midnimada Qaranka nuqul kalena Wasiirka Arrimaha Gudaha kuwaas loo diri doono blookyada.

Qod. 11

Lacagaha lagu keydiyey xisaabadka bangiga ee gobolka waxaa lagu hayn doonaa ilaa iyo intii Wasiirka Arrimaha Gudaha ilaa iyo intii la deji doono qorshaha iyo meesha lacagahaasi lagu bixin doono.

Qod. 12

Xoghayaha guddiga dhexe, oo magaaabay wasiirka arrimaha gudaha, wuxuu samaynayaa xisaaxir guud ee xaaladda maaliyadda, oo bil walba di u cusboysiinaya isagoo ku salaynaayo qaybaha xisaabxiridda oo loo diri doona guddoomiya goboleedyada.

Qod. 13

Sharciga wuxuu hirgeli doona maalinta ku xigta markii la faafiyo.

Muqdisho, 26 Oktoober 1966.

Wasiirka Arrimaha Gudaha
Abdulqadir Mohamed Aden

Rai'sul Wasiirka
Abdulqadir Mohamed Aden